

Sababta tallaalka loo qaato?



Tallaalku wuxuu jirkaaga ka dhigayaa mid xoog badan si uu ula dagaallamo COVID.

Kama qaadeysid COVID tallaalka.



Tallaalku waa kahortag. Wuxuu kaa ilaalinayaa inaad jirrato.



Waxaad tallaalka kaheli kartaa markuu tallaalka aa siiyo cudduda daryeel-bixiye caafimaadqaba.


Qaabka ugu fiican ee aan uga adkaan karno fayraska



Qaado tallaalka



Xiro maaskarada wajiga



Ka fogow 6 fuud dadka kale



Iska dhaq gacmaha



Iska ilaali shirarka waaweyn

Waxa la rajeyn karo



Qof walba waa lala socon doonaa muddo dhan 15-30 daqiiqo tallaalka kadib. Bixiyaha tallaalkaagu wuxuu hubin doonaa inaad fiican tahay.



Wixii tallaalada Pfizer iyo Moderna ah, waxaad u baahan doontaa laba irbad. Waxaad qaadan doontaa tallaalka labaad 3 ama 4 toddobaad kadib markaad qaadatid midka koowaad. Waa kuu muhiim inaad heshid labada tallaalka si uu tallaalku u shaqeeyo.



Tallaalka Johnson & Johnson waxaa laga qaataa hal irbad keliya.

Waa lagula socodsiin doonaa nooca tallaalka aad qaadanayso iyo nooca dabagalka, hadduu jiro, aad u baahan tahay inaad hesho. Waxaa lagu tixgelinayaa inaad si buuxda u tallaashay 2 toddobaad ka dib markii aad qaadatid tallaalkaagu ugu dambeeya.

Markaad tallaalka qaadato kadib



Gacantaada ayaa laga yaabaa inay ka xanuunto meesha lagaa duray.



Waxaad dareemi kartaa daal



Madax-xanuun ayaa ku qaban kara



Qandho ama Qarqaryo (aan badneyn)

Tani lama macno aha inaad jirran tahay. Waxay ka dhigan tahay inuu tallaalku shaqeynayo si uu jirkaagu u caafimaado.

Tallaalku waa aamin waana u lacag la'aan qof kasta



Dhammaan seddexda tallaalka ee la oggol yahay waa badqab. Dhammaan tallaallada waa la tijaabiyey si loo hubiyo inay badqab yihiin oo waxtar leeyihiin.

Tallaalku ma beddelayo hiddo-sidahaaga (DNA) kamana koobna wax laga soo qaaday xayawaan qalaad.

Tallaalka Johnson & Johnson wuxuu adeegsadaa fayras naga dhigaya kuwa iska difaaco COVID-19. Soo saarista tallaalkan fayraska ah wuxuu u baahan yahay adeegsiga unugyo lagu koriyay shaybaarrada kuwaasoo laga soo qaaday unug uurjiif sannado badan kahor. Tallaalka kuma jiro unugyada uurjiifka.

Tallaallada COVID-19 kama koobna qalab yar si dadka loola socdo. Sanduuqyada shixnadaha tallaalka ayaa lala socdaa, sida shixnadaha kale, si loo hubiyo in laga qeybiyo halka loo baahan yahay iyo si looga hortago xatooyada. Waxa kale oo jira diiwaanka halka aad ka qaadatay tallaalkaaga si loo hubiyo inaad hesho dhammaan qiyaasahaaga.



Tallaalku waa u lacag la'aan qof kasta oo ku nool Oregon. Laguguma soo dallici doono lacagta ballanta ama tallaalka.

Qof kasta oo ku nool Oregon ee u-qalma wuu heli karaa tallaalka mana saameyn doono xaaladdaada socdaal.

Ma la iiga baahan yahay caddeyn u-qalmitaan ama aqoonsi?



Uma **BAAHNID** inaad keento caddeyn u-qalmitaan ama aqoonsi. Bixiyeyaasha tallaalka waxay ku weydiin karaan inaad ku nooshahay gudaha Oregon ama nooca shaqada aad qabato.

Uma **BAAHNID** lambarka sugnaanta bulshada.

Uma **BAAHNID** caymiska caafimaadka.

Wixii macluumaad dheeri ah

Booqo covidvaccine.oregon.gov (Af-Ingiriis) ama vacunacovid.oregon.gov (Af-Isbaanish). Wac 211 si aad u hesho luuqado dheeraad ah. 211 waa khadka telefoonka gobolka ee tallaalka COVID-19. Muga wicitaanku wuu ka sareyn karaa kan caadiga ah.

Iska Tallaal Oregon

<https://getvaccinated.oregon.gov/#/>

Fariinta Qoraal ORCOVID ku dir 898211
(Ingiriis iyo Isbaanish kaliya)

limaylka ORCOVID@211info.org
(caawimaad luqadeed ayaa la heli karaa).

Wac 211, lambarka bilaashka ah 1-866-698-6155, 711 TTY

(way furan tahay laga bilaabo 6-da subaxnimo illaa 7-da fiidnimo maalin walba, oo ay ku jiraan fasaxyada).



Helitaanka dukumiintiga: Wixii shakhsiyadka naafada ah ama shakhsiyadka ku hadla luuqad aan aheyn Ingiriis, OHA waxay ku bixin kartaa warbixinta qaabab kale sida fasiraadaha, daabacadda balaaran, ama farta indhooleyaasha. Kala xiriir Xarunta Macluumaadka Caafimaadka 1-971-673-2411, 711 TTY ama COVID19.LanguageAccess@dhsosha.state.or.us.